# Sida loo Helo shaabada Xaqiijinta lagu Dhejiyo Dukumeentiga

---

**Dukumentiyada ay Tahay in la soo Diro:**
Xoghayaha Gobolka Minnesota waxa uu xaqiijin karaa dukumeentiyada notaaayeysan  ee uu si sax ah u nootaayeeyey Notary Public Minnesota ah ama nuqul asal ah oo shahaadaysan oo ka yimid Degmo Minnesota ah ama Hay'ad Gobolka Minnesota ah.

**Kharashyada**
Lacagta loo baahan yahay waa $5.00 oo laga rabo shahaado kasta oo la xaqiijinayo.
U qor jeega ama money order: MN Secretary of State.

**Tilmaamaha ku soo Dirista Boostada**
Markaad ku soo dirayso codsiga xaqiijinta boostada, fadlan soo raaci warqad ama isticmaal Authentication Request Form (Foomka Codsiga Xaqiijinta). Foomka Codsiga Xaqiijinta waxaa laga soo dejisan karaa: https://www.sos.state.mn.us/media/4253/authentication-mail-form.pdf

Dukumeentiyada nootaayeysan ee asalka ah iyo/ama kuwa la xaqiijiyay waa in ay la socoto khidmada khusaysaa. Dukumeentiyada waxaa lagu soo celiyaa ciwaanka jeega ku qoran aan ka ahayn haddii aad bixiso tilmaamo gaar ah oo lagugu soo diro ciwaan kale ama aad bixiso baqshadda soo celinta. Waxaad ku dari kartaa baqshada FedEx, USPS Priority Mail ama UPS oo horay khidmadeeda loo sii bixiyay, haddii aad rabto inaad isticmaasho adeega raadraaca boostada, fadlan soo raaci biilka dirista hawada ee horay loo bixiyay (pre-paid air bill.). Haddi aadan isticmaalin adeeg khidmada horay loo sii bixiyey, xafiiskeenu waxa uu kuugu soo diri dukumeentigaaga Boostada USPS First-Class oo bilaash ah.

**Xaqiijinta waxaa lagu dhammayn karaa shaqsi ahaan in loogu yimaado ballan ama boostada ayaa lagu soo diri karaa:**

Minnesota Secretary of State
First National Bank Building
332 Minnesota Street, Suite N201
Saint Paul, MN 55101

(U FURAN ballan qabsi keliya Isniin - Jimco, 8 a.m. - 4 p.m., marka laga reebo feestooyinka)

# Dhibaatooyinka Caadi ahaan lagal kulmo Xaqiijinta

Waxaa jira dhowr sababood oo ah kuwa ugu badan ee dukumeenti aan loo xaqiijin doonin:

**Haddii dukumeentiga aad xaqiijinayso uu nootaanyo ku shaabadaysanyahay:**

- **Shahaado la'aan -** Sida uu qabo xeerka Minnesota Statute 358.65 https://www.revisor.mn.gov/statutes/cite/358.65, ficil nootaanyada waa in lagu caddeeyaa shahaado. Tusaalooyinka shahaadooyinka foomamka gaaban ayaa lagu bixiyay xeerka Minnesota Statute 358.66 https://www.revisor.mn.gov/statutes/cite/358.66
- **Saxiixe Nootaayo Minnesota oo ansax ah -** Saxiixuhu waa inuu noqdaa mid ansax ah oo cusboonaysiisan, oo taariikhda dhicitaanka ee shaambada nootaayadu waa inay noqoto mid sax ah. Magaca ku qoran warqada nootaayadu waa inuu waafaqaa xogta diiwaanka nootaayada. Si loo go'aamiyo in nootaayadu shaqaynayso iyo sida magacoodu u diiwaangashanyahay ka raadi kaydka diiwaanka xogta nootaayada. [https://notary.sos.state.mn.us/Search/SearchForNotary](https://notary.sos.state.mn.us/Search/SearchForNotary)
- **Dukumeentiyada Iskuulka ee Aan Nootaayeysneyn -** Dukumeenti uu ku yaallo saxiixa madaxda iskuulku oo uu shaabadda iskuulka uu ku dhejiyey diiwaanhayaha iskuulku lama aqbali karo. Dukumeentiyada waa in ay nootaayeeyaan Minnesota Notary Public kahor inta aan shaabada xaqiijinta (Apostille) lagu dhejin dukumeentiga.
- **Dukumentiyada gaarka loo leeyahay -** Dukumeentiyada gaarka loo leeyahay, oo ay ku jiraan shahaadooyinka, qoraalka dhibcaha fasallada, shatiga darawalnimada iyo waraaqaha korsashada waxaa lagu shahaadayn karaa nootaayo Minnesota ah, waa inaad keento dukumeentiga asalka ah si nootaayeeyuhu uu nuqul uga sawiro. Nootaayuhu ma shahaadayn karo koobiga dukumeentiga haddii dukumeentiga asalka ah loo keeno mooyaane, oo uu koobiyeeyay, nootaayuhu isagu shakhsi ahaan.
- **Haddii nootaayuhu uu qabo wax su'aalo ah -** nootaayuhu waa inuu ka tixraacaa Hagaha Saxiixaha Nootaayada ee Minnesota (Minnesota Notary Commission Guide) https://www.sos.state.mn.us/media/3690/notary-commission-guide-2020.pdf ama waxa uu la xiriiri karaa xafiiskeena wixii macluumaad dheeraad ah.

**Cilladaha kale:**

- **Khidmadaha aan ku filnayn -** Kharashka laga rabo xaqiijintu waa $5 dukumeenti kasta oo la xaqiijinayo.
- **Waa inuu ku Yaallo Saxeexa Asalka ah Dukumentiga -** Dhammaan dukumeentiyada waa inay si sax ah u saxeexaan qof wakiil ah oo matala hay'ada soo saartay dukumeentiga waxaana loo baahanyahay inuu yahay saxeex asal ah oo UUNA AHAYN saxeex lasoo koobiyeeyey.
- **Dukumentiyada uu Diiwangeliyey Gobol Kale -** Gobolka soo saaray dukumeentiga asalka ah ayaa wuxuu u baahan yahay inuu shahaadeeyo dukumeentiga (tusaale ahaan, shahaadada dhalashada ee California ka timid waxay u baahan tahay in uu shahaadeeyo xafiiska Xoghayaha Gobolka California).
- **Dukumentiyada Federaalka -** Dukumentiyada Federaalka asalka ah laguma xaqiijinayo heer gobol. Fadlan kala xiriir Xafiiska Xaqiijinta ee Waaxda Gobolka ee Maraykanka 202-485-8000 ama booqo websaydkooda Travel.State.gov

**Meesha laga heli karo dukumeentiyada soo socda:**

- Diiwaanka dhalashada ama dhimashada: Waaxda Caafimaadka ee Minnesota

- Baasaboorada: Si aad u hesho baasaboor waxaad tegi kartaa xafiis kasta oo weyn oo boostada ah, xafiiska degmada ee aad degan tahay, ama booqo websaydka Waaxda Gobolka.
- Shahaadooyinka guurka: xafiiska degmada ee lagu bixiyay shatiga guurka.

Haddii aad wax su'aalo ah qabto, fadlan naga soo wac 651-296-2803 ama 1-877-551-6767 (9 a.m. ilaa 4 p.m.) MN Relay Service: 711